

15 MAG. 1990

Ku:

Madaxweyne
Maxamed Siyaad Barre

MUQDISHO

UJEE DO: Taloyin lagu gaari karo sulux wadani iyo
badbaadinta qaranka Soomaaliyeed.

Ragga hoos ku qotan oo ka kooban odayaashii iyo akhyaartii
u soo halgamay xorriyada wadanka, salaaciin, cuqaal ka socota beelaha
Soomaaliyeed oo idil, culumaa'udiin, indhærgarato, ganacsato, waxay
kulligood isku wada raacsen ineyan iska inha tiri karin xilka iyo
waajibka ka saaran - mag Islaannimo iyo mag Soomaalinimoba - xaaladda
khatarta ah ee uu ku sugan yahay dalkeennu, kana aamusi karin dhiba-
tooyinka aan ku jirno oo aan loo adkeysan karin.

Waxaa murug iyo walwal lagu haya burburka, hoogga iyo
ba'a dadkeennu iyo dalkeennuba ay ku sugan yihiin oo aan horay taa-
riikhdeenna noo soo marin, sida:

- 1.- DAGAAL SOKEEYE oo weli ka dhex socda Ciidamada Dowladda iyo Jab-
hado hubeysan oo ka soo horjeeda, kaambo keenay khasaaro aan la
koobi karin, nar iyo maalba, sida:
 - A)- dilka kumaan kunoo qof oo aan dagaal ku jirin, waayeel leh,
carruur leh, dumar leh, ee xabbaar ka iska mariyey, maalkoodiina
la dhacay;
 - B)- qaxiida boqolaa kunoo Soomaali ah, oo cabsi daraadeed naftooda
la cararay, darana ku kalliftay iyo magan galaan dalal ay ka
mid yihiin Ethiopia iyo Kiirya;
 - C)- burburka iyo bililiqeysiga ku dhacay magaalooyin waaweyn iyo
tuulooyin fara badan oo ay ka mid yihiin Harheysa, Burco, Shilich
Ceerigaavo, Buuhoodle, Gaalkacyo, Galdogob, Beyra, Docol, Warga-
lo, Hilimo iyo rawaaxigeedo, Afmadow, Libooy iyo Badhaadhe.
Waxaa kaloo intaas ka darsan oo iyana xus mudan in, si ula kac
ah, dhul oomane ah, loo baadi'iyey baraktii iyo ceelashii
dadka reer guurtiga ahi uu ku noolaa.

NABADGELYO LA'AAN koobtay dalko idil, miyi iyo magaalaba, gaarteyna heer uusan jirin qof Soomaali ama ajnabi ahi oo aan haatan ka walwaleyn cawabariga, naftiisa, cheladiisa iyo maalkiisaba, taasoo ay weheliso fidno qabali ah oo ka dhex oogan gobollo badan iyo burcadnimo ka dillaa day meel kasta, is hortaagteyna horumar dhaqaale iyo ganacsi, iyo weliba nabad ku wada noolaashaha ummadda Soomaaliyeed.

3.- XADGUDUB XUQUUQDA MUWA'DINKA: Xukunka maanta dalka ka jira wuxuu si toos ah isugu gaar yeelay maamulka siyaasadda, dhaqaalaha iyo arrimaha, bulshada, wixuuna ka hor is targey muwaadiniinta iney ka qeyb qaataan talaka maamulka dalka, iyadoo isla markaasna muwaadin kasta loo diidayo inuu fikraddiisa ka dhiibto mashaakilka dalka ka taagan, sidaasna lagu cabburiyo korriyadkiisii uu hantay markii dalku uu gaarey gobonimo qaran, 1960kii.

Waxaa caado noqotay in ruuxii wax yar oo dhaliil ah u jeediya Xukuumadda la xiro isaga oo aan maxkamad la hor geyn.

Waxaa marag ra doonto ah in dhac badan la iska xiray, iyadoo xabsiyada ku jiray muddooyin kala duwan oo gaarey ilaa 17 sano, qaarna ay kuba geeriyoodeen. Ku tumashaha Xuquuqul Insaanka dalkeenna waxay ka noqotay hab caadi ah, waxayna ina dhaxalsiisay in dalkeennu uu ka mid noqdo dalolka yar ee ku caan baxay arrintaas.

4.- MAAMULXUMO DOWLADEED oo ay bartilmaameed u noqdeen musuqmaasuq, laaluush, boob hanti qaran, eex-qabiil iyo cadaalad la'aan, iyo kartixumo ilaa xad aannu oran karno waxaa lumay dareenka qaran-nimo, isla markaasna ay burbureen dhisnaha Maamulka Dowladda iyo Adeegyadii nololaha dadweynaha aasaaska u ahaa, sida Hey'adihii nabadgelyada, caafimaadka, waxbarashada, biyaha, xoogga korontada, iyo wlm (Maamulxumidu waxay gaartey - waad yaabe - ilaa heer ay banuuktii ay Dowladdu laheyd ay diidaan iney aqbalaan jeegaggi lacag u yaalka ahaa - assegni circolari - ee ay banuuktu laftoodu bi-xiyeen !!).

War iyo dhamantiis, waxaad moodaa xilkas la'ida rajiimku iney gaartey xad aan wax mas'uuliyad ah oo ka saaran iyo wax xurmo ah oo ay u hayaan shaqbiga Soomaaliyeed ee yan jirin.

Waxyaalaha uuf ku-taallo iyo tiiraanyo xanuun badan nagu abuuray waxaa ka mid ah sida loo dooriyeey ujeedooyinkii loo dhisay Xoogga Dalka Soomaaliyeed oo ahaa inuu cadowga shisheeye ka daafaco calanka iyo xuduudda badanka, isagoo ka sareeya qabiil iyo siyaasad xisbi ama mid koox gaar ah. Qiime aan la soo koobi karin ayuu ugu ka

...//...

shacbiga Soomaaliyeed dhismaha Ciidanka, han weynna waa loo qabay.

Waxaa nasiib darro ah inuu haatan isu rogey aalad lagu adeegto si dan gaar ah loogu qunsado, dadka Soomaaliyeedna loogu dulmo. Taasuna waxay sabab u noqotay in Xooggii laftiisu uu burburo, magac iyo maskabna jabo, si dib loogu habeeyana ay adag tahay, kaddib markii uu qabiil u kala baxay.

BURBUR DHAQAALE: Xagga dhaqaalaha, waxaan maanta la isku heyn in faqrigu iyo gaajaduba ay taabteen guri kasta ee Soomaaliyeed, in yar mooyee, wadankiina uu halis ugu jiro inuu musallaf noqdo, dowlad iyo dadba. Taasi waxay keentay in kumaankunoo Soomaali ihi ay dalkooda uga yaacaan affarta beynujaho. Waxaa nasiib darro ah in inta yaacday ay u badan yihiin indheergaratadii iyo dhallinyaradii wax tiqin oo uu dalku si gaar ah ugu baahnaa, mustaqbalka dhinaca horukaca.

Hoogga iyo ba'a maanta Soomaali heysta oo halis geliyey jiritaankii Soomaalida - qofnimo iyo qarannimoba - waxaa sabab u ah maamul xumida dalka maanta taal oo ka hor taagan muwaadiniinta iney, si xornimo ah, ugu qeyb qaataan go'aannada talada wadankooda, maamul xumidaasoo - weliba shacbiga ka qadey suldaddii ummadeed ee uu xaqqa u lahaa.

Annaga aragtidayada suurogal na aha in laga gaaro xal dhama meys tiran arrimaha arrnu kor ku xusnay haddaan la helin ISBADDAL TAAM AH ee xukuumadeed, iyadoo dib loo soo celinayo nidaamkii dimoqraadiga ahaa ee uu shacbigu doortay, isagoo xor ah, 1960kii, oo aan misna loo oggolaan muwaadinka Soomaaliyeed inuu khiyaarkiisa ku doorto hoggaanka dowladda - heer Madaxweyne, heer Xukuumad, heer Baarlamaan, heer Gobol, heer Degmo, si degdeg ah, siduu xaqqa u leeyahay.

Waxaa xusid midan in Xukuumaddu ay in dhaweydba ku dhawaaqeysay iney diyaar u tahay in nidaamkii xisbiga keliya ku dhisnaa la bedelo oo la dhiso nidaam cusub oo ku saleysan axsaab badan, sidnas awgeedna in dastuurka maanta jira taddiil lagu sameeyo, sannadka 1990ka gudahiisa, lana abaabulo doqorasho cusub oo lagu dhiso baarlamaan iyo xukuumad cusub.

Hase yeesh'e, xaqiiqadu waxay tahay in shacbiga Soomaaliyeed uu ka daaley hadaltiro, labaatankii sano ee dambe, uuna haatan gaarey heer ussan rumeysan wax kactoo loo sheego, haddaan la tusin ficil cad oo muuqda.

Si loo sugo himilada soo celinta nidaamkii dimoqraadiga ahaa waxaa laga maarwaan ah in shacbigu uu ka qeyb qaato howsha iyo habka golkaas lagu gaarayo. Waxaadse moodaa ineeyan arrintaasi u cuntameyn kuuumadda maanta talada heysa oo qabta inaan talada wadanka lala wagaagin, iyadoo ay misana coddahay ineeyan heyn awood ay keligeed nooga amatabixin karto dhibaataada maanta dalka ka taagan.

Sidaas darteed waxaa lagama maarmaan ah in Soomaali oo dhan lagu yeero, kartideeda iyo garaadkeedana meel la isugu keeno, si ay a tashato aayaheeda dambe.

Si loo abuuro jawi xorriyadeed iyo nabadeedba, dastuur-sameyn oo doorasho ka hor, waxaa loo baahan yahay in la baabi'iyo sharciyada quuqul insaanka iyo xorriyaadka kaleba cabburinaya iyo hey'adaha u-edaas darteed loo dhisay, sida:

- Sharciga 10 Jan.1970, lr. 01 - Awoodda Xarigga
- Sharciga 10 Jan.1970, lr. 03 - Dhismaha Maxkamadda Badbaadada
- Sharciga 15 Feb.1970, lr. 14 - Dhismaha Hey'adda NSS
- Sharciga 10 Sept.1970,lr. 54 - Ilaalinta nabadsugidda qaranka
- Sharciga 10 Okt.1970,lr. 64 - Baabi'inta Habeas Corpus
- Sharciga 01 Novb.1970,lr. 67 - Difaaca Bulshada
- Sharciga 05 Abr.1972, lr. 38 - Awooda GSK Arrimaha Garsaorka.

Isla markaas waxaa laga maarmaan ah in Xeerka Ciqaabta iyo Xeerka Habka Ciqaabta (Codice Penale e Codice di Procedura Penale - 16 Dish. 1962, lr.5 iyo DL 10 Jan. 1963, lr.01) lagu soo celiyo si ay ahayeen rejimkan ka hor, si shacbiga loogu soo celiyo xorriyadkiisii oo dhammeys tiran oo ay markaas suurogal ugu noqoto inuu qami karo, tashan karo, dhisan karo ururro siyaasadeed iyo kuwo bulshadeed.

Si durbadiiba loo joojiyo dhiigga Soomaaliyeed ee haatan ku adanaya meel kasta, nabad iyo xasiloonina loogu soo celiyo dalka, si siyaasadeedna loogu helo dagaalka sokeeye ee ka holcaya wadanka dibil, iyo si loo dhiso nidaam dimoqraadi ah oo ku saleysan rilladu shacbiga, waxaa lagama maarmaan ah in la qabanqaabiyo kulan lagu magacaabo SHIRWEYNAHA SULUXA IYO BADBAADADA UMMADDA, oo annaga ay nala qabsan tahay in lagu qabto goob dhexdhexaad ah, sida Jabuuti, Saudi Arabia, Madaxda Italia. Si loo xaqiijiyo abaabulka Shirweynahaasna, ay nala qabsan ay in horta la dhiso guddi lagu magacaabo GUDDIGA DIYAA-ADADA SHIRWEYNAHA SULUXA IYO BADBAADADA UMMADDA oo ka kooban akhiyaar

Soomaaliyeed oo xurmad iyo kalsooniba shacbiga ka heysta. Annaga arag-
ayada shuruudahaas waxa buuxin kara akhiyaarta hoos ku qoran:

- 1.- Xaaji Aaden Cabdulle Cusmaan - Madaxweyne hore
- 2.- Sheekh Mukhtaar Maxamed Xusseen - Madaxweyne iyo Guddomiye Baarl. hore
- 3.- Xaaji Muuse Boqor - Wasiir hore
- 4.- Dr. Ismaaciil Jumcaale Cosoble - Wasiir hore
- 5.- Dr. Maxamed Raajis Ahmed - Mudane Baarlamaan hore
- 6.- Maxamed Abshir Muuse - Taliye Ciidanka Boliiska hore
- 7.- Dr. Maxamuud Sheekh Axmed - Guddomiye Maxkamada Sare hore
- 8.- Suldaan Duulane Rafle Guuleed - Oday Soomaaliyeed
- 9.- Cali Shido Cabdi - Guddoomiye ku-xigeyn SYL & Safiir hore
- 10.- Garaad Cabdulqani Garaad Jaamac - Oday Soomaaliyeed
- 11.- Xaaji Jirde Xusseen Duceale - Ganacsade
- 12.- Sheekh Ibraahim Suuley - Caalim Diinta Islaamka
- 13.- Sheekh Shariif Sharafow - Caalim Diinta Islaamka

Xilka Guddiga Qabariqaabada Shirweynaha Suluxa iyo Badbaadada Um-
madda wuxuu noqon doonaa:

- 1.- Qabariqaabada, diyaarinta ajendada iyo nidaamka loo maamulayo Shirweynaha;
- 2.- Xulashada iyo u yeerida xubnaha ka soo qeyb galaya Shirweynaha;
- 3.- Talo uruurinta iyo la tashadka qof kasta iyo hey'ad kasta oo ay dan bidaan, wadanka gadihiisa iyo dibeddiisaba;
- 4.- La xaajoodka Xukuumadda iyo Mucaaradka oo dhan, iyadoo ujeedadu tahay in loo gogol xaaro xal siyaasadeed oo nabad dhalin kara.

Waxaa lagama maarmaan ah in Shirweynaha ay ka soo qeyb galaan:

- a)- Xubno awood buuxda leh oo ka socda Xukuumadda;
- b)- Xubno awood buuxda leh oo ka socda Jabhadaha iyo Mucaaradka oo dhan;
- c)- Xubno awood buuxda leh oo ka socda Gobollada wadanka oo idil, xurmo iyo kalsoonina ka heysta dadkooda;
- d)- Xubno ka socda Indheer garatada, Bulumaa'uddiinka iyo Ganacsatada.

Himilooyinka la doonayo in Shirweynuhu uu xaqiijiyo waa:

- 1.- Joojinta dhiigga Soomaaliyeed ee meel kasta ku daadanaya iyo in lagu soo celiyo dalka nabad iyo xasilooni;
- 2.- In heshiis siyaasadeed laga gaaro mabaadiida caamka ee dastuurka wadanka loo sameenayo;
- 3.- In heshiis siyaasadeed laga gaaro jadwalka, waqtiga iyo habka lagu

...//...

qabanqaabin doono doorashooyin xor ah oo lagu dhiso Baarlamaan iyo
Madaxweyne cusub, dib u habeen nidaamka dhaqaalaha, midka Maamulka
Guud, midka Ciidamada iyo midka Adeegyada Bulshada;

4.- Dhismo Xukuumad ku noqo ghar ah ee fulisa go'aannada Shirweynaha.

Ugu dambeystii, waxaannu rajeyneynaa inaad nala garato khatarta
- ee aan horay noo soo marin - ee maanta dadkeennu iyo dalkeennuba ku
sugan yihiin, si wax qabadka loo baahan yahay loo siiyo ihtimaamka iyo
degdegta ay mudan yihiin oo ay u suurowdo in Somali la daba qabto.

Ilaah waxaannu ka baryeynaa inuu tofwiliqda nagu toosiyo.

(WAXAA LIPAAQAN SAXIIXYADA ODAYAASHA BAYAANKA QORAY)

15 MAG. 1990

- 35) Cabdulaahi Cumar Bootaan
- 36) Maxamed Siciid Ciyow Gentelman *Richard Said Punt* - Trader
- 37) Maxamed Liiriye *LALA* - MECH. Engineer.
- 38) Dr. Sheekh Cali Maxamuud *BC (Cali) Ex. D.G. Central Bank.*
- 39) Bashiir Ciise Cali -
- 40) Xaaji Cali Geeddi Shadoor *Xo Ji Shi Ghali* - former member *Parto*
- 410 Khaliif Jaamac
- 42) Dr. Muumin Cumar *Maxmed* - Lawyer
- 43) Yuusuf Jaamac *Yusuf*
- 44) Dr. Axmed Maxamed Darmaan - former *Member of Parliament*
- 45) Cabdi Xaaji Yuusuf Shuluc - *Trader*
- 46) Xaaji Axmed Raage Cabdi - *former Reg. Governor*
- 47) Cabdi Bullaale
- 48) Inj. Cabdulqadir Aadan Cabdulle *Only. M. with former Min*
- 49) Axmed Ismaaciil Boqor *Kt. H. M. Y. Col.*
- 50) Cabdulqadir Iimaan *Madan*
- 51) Maxamuud Xaaji Cabdulaahi Qore *Minister*
- 52) Xasan Xaaji Maxamed
- 53) Dr. Maxamuud Muxumed Xuseen *Minister*
- 54) Cabdulaahi Xaaji Yuusuf Cigaal *Minister*
- 55) Dr. Cabdi Maxamed Maxamed *Minister*
- 56) Jibriil Xasan Maxamed *former Lt. Col*
- 57) Maxamuud Geeddi Maxamuud *former*
- 58) Maxamed Cali Xuushi *former*
- 59) Axmed Cilmi Cismaan *former*
- 60) Cabdi Iidle Shuuriye *former*
- 61) Xuseen Axmed Cabdulle *former*
- 62) Ibrahim Rooble Warfa *former Lt. Col*
- 63) Faarax Warsame Cismaan *former*
- 64) Axnaday Sheekh qaasim *former*
- 65) Cali Iimaan Gadaw
- 66) Sheekh Cabdirashiid Sheekh Cali Suufi *former*
- 67) Cali Maxamed Osbite
- 68) Cabdulaahi Faarax Hoolif *former*
- 69) Xaaji Maxamuud Koogaar *former*
- 700 Xasan Barre *former*
- 71) Xasan Guureeye Warshe *former*
- 72) Dr. Cabdulqadir Maxamed *former*

73) Wire Cali Cismaan

74) Abshir Kaahiye-Faarax

75) Xiiracy Qaasim Weheliye

76) Cali Maxamed Guuleed

77) Xaaji Maxamed Cabdulle Furro

78) Cali Maxamed Ibraahim

79) Axmed Sheekh Maxamed

80) Cali Calas

81) Cabdi Maxamed Khayre

82) Xaaji Axmed Xaaji Maxamed

83) Cabdulaahi Xuseen Maajoor

84) Saadaad Cali Diini

85) Sheekh Abuunkar Mapallin Cali

86) ABDIRASHID Mohamad

87) XASAN CAASHUUR Mohamad

88) CABDULLAHI MAXAMUD MATUKADE EX COMMANDANT OF POLICE

89) SACIID (USMAAN KEYNADIID)

90) MAXAMED MAXAMUUD JAMAAL

91) CAADIR XAASI JACIID

92) C/LLAHI MAXAMED YUUSUF

93) MAXAMED XAASI CUMAR

94) CUMAR MAXAMED GUULEED

95) XAASI AXMED CALI ISLAWEYN

96) XAASI FAARAX CUSMAAN

97) MUUSE YUUSUF CALI

98) CABDIXAMIID ISLAAN FAARAX

99) OSMIYAN OSMIYAN SHILXIAAR

100) ABDI Rehman Shih Nur

Amir Ali

Rtd. Col. Palmer Reg. Colonel

Businessman - Owner S.M. Chen Ind. (SCI)

Abu Gulleed

Abu Furro

Abu Calas

Abu Khayre

Abu Maajoor

Abu Diini

Abu Mohamad

Abu Xasan

Abu Saciid

Abu Jamaal

Abu Jaciid

Abu Yuusuf

Abu Cumar

Abu Guuleed

Abu Islaweyn

Abu Cusmaan

Abu Muuse

Abu Xaasi

Abu Axmed

Abu Cali

Xuseen Reg - Hotel owner

AKI command

عمر محمد قورق

البحر الجدي

عناج عالج

موسى يوسف علي

فارس

فارس

NO. 1590

Moxamed Jilwan Gayde
DUBAD SUGULLE MOXAMUD
HATI MXD. CAWALE LIBAAN

- JAMA ALI JAMA
- MAXAMED YUSUF FAARAX
- YASIIN GUURE CALI
- MAXAMED CUMAR SAAMAC
- C/LAABI CIISE YUSUF
- MAXAMED SADIID ISMACIIL
- BEELDAAJE CALI NUUR FAARAX (BIN JACEYL)
- CABDI MUXUMUD AAHIN
- AXMED CABDI DAHIR (SHELL)

Muhammad
Dijay
Mohamed Gona
[Signature]

asanti
eciona
raxy
vaxi
vaxi
390
aa

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

A S. ECC.

IL GENERALE MOHAMED SIAD BARRE
PRESIDENTE DELLA REPUBBLICA DEMOCRATICA SOMALA

MOGADISCIO

OGGETTO: Proposte per una riconciliazione nazionale e per risolvere
la grave situazione del paese.-

Noi firmatari della presente, anziani ed esponenti politici che nel passato lottarono per l'indipendenza della patria; sultani ed esponenti tribali dei vari Distretti; personalità religiose, intellettuali ed imprenditori economici, dopo lunga attesa e riflessione abbiamo fra noi convenuto di non potere continuare ad ignorare le responsabilità ed i doveri che su di noi incombono, come somali e come musulmani, davanti alla grave situazione in cui versa il nostro paese; nè altrettanto di continuare a tacere sulle indicibili tribolazioni che a causa della situazione medesima il nostro popolo è soggetto.-

Siamo profondamente preoccupati ed amareggiati per le distruzioni, i massacri e lo sfacelo politico, amministrativo ed economico, senza precedenti, in atto nel nostro paese in conseguenza dei fattori sotto elencati.-

1)- Guerra civile: le ostilità da lungo in corso tra le forze governative e le formazioni guerrigliere avversarie, hanno già causato danni incalcolabili in perdita di vite umane e di beni, come ad esempio:

a)- l'uccisione di migliaia di persone inermi tra cui donne, vecchi e bambini, passati per le armi e depredati dei loro averi ad opera delle forze governative;

b)- la distruzione ed il saccheggio operati dalle forze governative in città e villaggi come Hargheisa, Burao, Erigavo, Buhodle, Galcaio, Galdogob, Do'ol, Wargalo, Halmo e dintorni, Afmedò, Liboy e Badhadhe;

c)- la deliberata distruzione, ad opera delle forze governative, di bacini per la conservazione dell'acqua, di pozzi e di altre opere per l'approvvigionamento idrico delle zone aride, a danno dei pastori nomadi e del loro bestiame;

d)- la fuga di centinaia di migliaia di somali che per salvare la propria vita hanno cercato rifugio nei paesi più disparati del mondo.-

2)- Persistente violazione dei diritti umani: il regime al potere ha sempre esercitato e continua ad esercitare il potere in maniera assoluta ed esclusiva, impedendo ai propri cittadini di esprimere il proprio parere sui problemi del paese e privandoli di quei diritti e di quelle libertà per cui essi avevano tanto lottato ed in fine conseguito con l'accessione del paese all'indipendenza nel 1960.-

E' pratica inveterata del regime incarcerare, senza imputazione alcuna e senza alcun procedimento legale, chiunque osi minimamente criticare il suo operato. E' un fatto innegabile che moltissime persone che hanno mosso critiche al governo, o soltanto sospettate di essere contrarie al regime, sono state imprigionate e tenute in stato di detenzione preventiva (in alcuni casi sino a ben 17 anni), e che alcune di tali persone sono decedute in carcere o sotto tortura. E' altrettanto innegabile che in diversi casi il regime ha proceduto alla esecuzione in massa, senza imputazione né processo, persone ritenute, per il solo fatto di appartenere ad una determinata tribù, oppositori. Il disprezzo per i diritti umani ha reso il presente regime tra i più tristemente famosi nel mondo.-

3)- Mancanza di sicurezza: estesa ormai a tutto il paese, nelle città e nelle campagne, ha raggiunto un livello tale che oggi non vi è alcuno, cittadino o straniero, che non abbia a temere per la propria vita, per quella dei suoi familiari e per i propri beni. Il brigantaggio armato dilagante in tutto il paese, ed i conflitti tribali in corso in varie regioni, aggravano ulteriormente lo stato di insicurezza generale.-

4)- Sfacelo economico: l'indigenza e la fame hanno toccato, con poche eccezioni, ogni casa ed ogni famiglia somala, ed il paese è giunto al completo crollo economico. Una caratteristica peculiare di questa situazione è il fallimento delle banche, tutte gestite dallo Stato, le quali non sono nemmeno in grado di onorare i titoli di credito da loro emessi, né di fare fronte ai loro impegni verso i risparmiatori.-

A causa della gravità della situazione economica creatasi sotto il regime attuale, migliaia di cittadini si sono trovati costretti ad

emigrare in cerca di lavoro. Sfortunatamente la maggioranza di tali emigrati è costituito di giovani intellettuali, di professionisti, di mestranze tecniche e di operai specializzati di cui il nostro paese tanto necessita per il suo sviluppo.-

5)- Mala amministrazione della cosa pubblica: il malcostume amministrativo, la corruzione a tutti i livelli, il nepotismo, l'ingiustizia palese e l'inefficienza dei pubblici funzionari, sono una triste realtà, ed hanno raggiunto proporzioni tali da minare la esistenza stessa dello Stato, ed hanno fatto perdere al regime ogni credito ed ogni rispetto da parte del popolo.-

6)- Uso dell'Esercito Nazionale come strumento di oppressione: Un'altra fonte di gravi preoccupazioni, per noi, è l'uso che il regime fa dell'Esercito Nazionale; uso del tutto contrario ai fini istituzionali di questo organismo che in origine erano la difesa dei confini della madrepatria e delle istituzioni nazionali dai nemici esterni, restando al di fuori di ogni divisione tribale, di fazione politica e di ceto sociale.

E' doloroso constatare come le Forze Armate siano state trasformate in uno strumento per il mantenimento del regime al potere, di oppressione del popolo somalo e di repressione di ogni forma di dissenso collettivo nei confronti del regime stesso, e perciò divenute fattore di divisione, di disordine e di distruzione del paese. L'allontanamento dall'esercito degli elementi più professionalmente e tecnicamente preparati, unitamente a quanto sopra detto, ha tolto ad esso ogni prestigio, efficienza e la ragione stessa della sua esistenza.-

Il risanamento dell'esercito, nella condizione attuale, si prospetta assai difficile, se non impossibile, essendo esso minato nel suo interno anche da profonde divisioni tribali.- La sua formazione è costata al popolo somalo un altissimo prezzo, ed al suo nascere molte speranze erano state in esso riposte.-

E' nostra profonda convinzione che la situazione di completa rovina in cui versa il paese, sia diretta conseguenza dell'impedimento sempre posto, dal regime al potere, al libero esercizio dei diritti politici e della propria sovranità da parte dei cittadini; e che non si

possa giungere alla soluzione definitiva della presente disperata situazione senza il cambiamento totale dell'attuale regime ed il ripristino del sistema democratico precedente all'avvento al potere del medesimo. - Riteniamo inoltre che sia urgente quanto mai che il cittadino venga messo nella condizione di potere eleggere in piena libertà le persone che devono guidare il paese: Presidente della Repubblica, membri del governo, membri del Parlamento, e le autorità distrettuali e regionali, come è suo diritto. -

Recentemente il governo ha dichiarato di essere disposto ad abbandonare l'attuale sistema nonpartitico ed a sostituirlo con uno basato sul pluripartitismo, a provvedere perchè alla presente Costituzione vengano apportate le modifiche necessarie in tale senso, e ad indire libere elezioni entro l'anno 1990 in corso per un nuovo Parlamento ed un nuovo governo. -

Ma in conseguenza della pratica del regime di non mantenere le sue promesse, il popolo somalo è divenuto scettico al punto di non credere più a quello che dice il governo ed il regime, a meno che, una volta tanto, alle parole non seguano fatti concreti. -

Perchè la speranza nel ripristino del sistema democratico possa divenire realtà, è necessario innanzitutto che il popolo partecipi, attraverso suoi veri rappresentanti, ai lavori preparatori che dovranno portare al ripristino di tale sistema. -

Pare che questa necessità non si prospetti al regime in carica, che continua ad agire da solo e di sua esclusiva iniziativa, pur essendo più che evidente che esso non può, da solo, porre rimedio alla attuale grave situazione in cui il paese versa. Sarebbe invece opportuno che il regime inviti tutti i somali ad unirsi per trovare insieme le soluzioni più adatte e per decidere sul futuro del paese. -

Per creare il clima di libertà e di pace indispensabile alla preparazione di una nuova Costituzione ed alla conseguente indizione delle elezioni, è necessario che:

- a) - già da adesso vengano sciolti gli organi di repressione esistenti, e che vengano abrogate le seguenti leggi oppressive:
 - la legge 10 Gennaio 1970, n. 1, sul potere di detenzione preventiva;

- la legge 10 Gennaio 1970, n. 3, istitutiva della Corte di Sicurezza Nazionale;
- la legge 15 Febbraio 1970, n. 14, istitutiva del Servizio di Sicurezza Nazionale;
- la legge 10 Settembre 1970, n. 54, sulla tutela della sicurezza dello Stato;
- la legge 10 Ottobre 1970, n. 64, relativa alla abrogazione del diritto di "Habeas Corpus";
- la legge 1° Novembre 1970, n. 67 sulla protezione sociale;
- la legge 5 Aprile 1972, n. 38, relativa al potere del Consiglio Rivoluzionario Supremo in materia giudiziaria;

b)- il Codice Penale ed il Codice di Procedura Penale (DL 16 Dicembre 1962, n. 5, e DL 10 Gennaio 1963, n. 1) vengano riportati alla loro originaria formulazione, e cioè come essi erano prima dell'avvento al potere del presente regime, di modo da reintegrare il cittadino nei suoi diritti fondamentali, tra i quali principalmente il diritto di associazione ed il diritto di esprimere liberamente il proprio pensiero;

c)- venga quanto prima indetta una conferenza di riconciliazione nazionale, da tenersi in un paese neutrale come Gibuti, Arabia Saudita, Egitto o Italia. Tale conferenza dovrebbe essere organizzata ed indetta da un comitato composto di personalità di prestigio e che godano del rispetto e della fiducia del popolo somalo.-

A nostro avviso le persone più adatte, secondo i requisiti di cui sopra, a costituire detto comitato, sono quelle seguenti:

- 1.- ADEN ABDULLA OSMAN;
- 2.- SCEK MUKHTAR MOHAMED HUSSEN;
- 3.- Dr. ISMAIL GIUMALE OSSOBLE;
- 4.- HAGI MUSSA BOGOR;
- 5.- MOHAMED ABSCIR MUSSE;
- 6.- Avv. MOHAMED RAGIS MOHAMED;
- 7.- JIRDEH HUSSEN DOALE;
- 8.- SULDAN DULANE RAFLE GULED;
- 9)- ABDULKHANNI GARAD GIAMA;
- 10.- MOHAMED SCEK AHMED;
- 11.- ALI SCIDDO ABDI;

12.- SCEK IBRAHIM MOHAMED ALI;

13.- SCEK SCERIF SHARAFOW.-

Il Comitato Preparatorio della conferenza di riconciliazione nazionale dovrebbe:

a). organizzare ed indire la conferenza, prepararne l'Agenda e stabilire la procedura secondo la quale i lavori della conferenza dovranno essere condotti;

b). invitare le organizzazioni e le personalità che dovranno partecipare alla conferenza;

c). redigere, fare sottoscrivere e pubblicare le deliberazioni della conferenza;

d). fare opera di mediazione, tra il regime al potere ed i vari gruppi di opposizione, nell'intento di trovare una soluzione politica atta a riportare la pace al paese.-

Il Comitato Preparatorio dovrebbe essere coadiuvato nei suoi compiti da una segreteria e da consulenti di sua scelta.-

Alla Conferenza predetta dovrebbero partecipare, a pieni diritti:

= esponenti del regime al potere, muniti di pieni poteri;

= esponenti dei gruppi dissidenti armati e degli altri gruppi di opposizione, muniti di pieni poteri;

= personalità di rilievo, scelti tra le popolazioni dei distretti;

= esponenti della classe intellettuale, esponenti religiosi ed esponenti della categoria degli imprenditori economici.-

La Conferenza di Riconciliazione Nazionale dovrà portare i seguenti risultati:

a)- cessazione della lotta armata, sia a carattere politico che tribale, ed il ripristino della pace e dell'ordine nel paese;

b)- un accordo sui principi generali cui la nuova Costituzione dovrà ispirarsi;

c)- un accordo sul termine entro il quale dovranno essere indette elezioni libere per la formazione del nuovo parlamento, per il nuovo Presidente della Repubblica; dovrà essere portato a termine il risanamento dell'economia, della pubblica amministrazione, delle Forze Armate e dei servizi pubblici;

d)- formazione di un governo provvisorio con il compito di preparare la Costituzione, indire le elezioni ed eseguire le deliberazioni della conferenza di riconciliazione.-

Per concludere, formuliamo la speranza che l'Ecc. Vostra convenga con noi sulla gravità della situazione in cui il nostro paese ed il nostro popolo versano, e sulla assoluta urgenza di mettere fine, in via pacifica, a tale situazione.-

Nell'attesa di una risposta da parte Vostra, preghiamo il Signore perchè ci guidi sul giusto cammino e ci assista nei nostri sforzi nella ricerca della pace.-

IL CONSIGLIO PER LA RICONCILIAZIONE E LA SALVEZZA NAZIONALE

Seguono nominativi e firme.-

Mogadiscio, addi 1990